

## Waxaad Xaq u Leedahay Inaad Cabasho Gudbiso

Bixiyaha TEFAP waxaa ka go'an in uu ilaaliyo deegaan ka madax banaan dhaqanka takoorka oo uu siiyo fursad siman si uu cunto u siiyo dhammaan ka qaybgalayaasha iyadoon loo eegayn isir, midab, asal qaran, diin, sinji, naafonimo, da', xaalad guur, xaalad qoys/waalidnimo, dakhli ka yimaadda barnaamij taageero dadweyne, aaminsanaan siyaasadeed, aargudasho ama aargoosi hawlo xuquuq madani oo hore.

Ka qaybgalayaashu waxay xaq u leeyihiin inay dacwoodaan marka ay rumaysan yihiin in loola dhaqmay si aan caddaalad ahayn, si aan macquul ahayn, ama hab ka kooban takoorid ama dhibaataayn. Waa xaq aad u leedahay inaad hesho jawaab celin waqtigeeda ku habboon oo aan ka cabsanayn aargoosi ama saamayn ku yeelan helitaanka cuntada. Cabashooyinka ka qaybqaatayaasha waxa wax laga qaban doonaa ugu dambayn 30 maalmood oo shaqo kadib cabashada la sameeyay.

**Ma jirto hab khaldan oo cabasho loo sameeyo. Cabashada waxaa loo gudbin karaa mid ka mid ah kuwan soo socda:**

- Khaanadda Cuntada/Magaca Barnaamijka:
- Bangigga Cuntada - Magaca:
  - Ciwaanka iimaylka/Telefoonka:
- Khadka Caawinta Cunnada MN: 1-888-711-1151
- Foomka cabashada onlaynka ah
- MN DCYF OEO [MNTEFAP.DCYF@state.mn.us](mailto:MNTEFAP.DCYF@state.mn.us)
- Ku socota wakiilada degaankaaga iyo/ama gobolka
- Ku socota USDA



**Foomka Cabashada Onlaynka ah**

### **Bayaanka Takoor La'aanta ee USDA**

Iyadoo la raacayo sharciga iyo xeerarka federaalka ee xuquuqda madaniga ah ee Waaxda Beeraha ee Maraykanka (USDA), USDA, wakaaladaheeda, xafiisyada, iyo shaqaalaha, iyo hay'adaha ka qaybqaadanaya ama maamula barnaamijyada USDA waxaa ka mamnuuc ah takooridda ku salaysan isir, midab, asal qaran, diin, sinji, naafonimo, da', xaalad guur, xaalad qoys/waalidnimo, dakhli ka yimaadda barnaamij taageero dadweyne, aaminsanaan siyaasadeed, aargudasho ama aargoosi hawlo xuquuq madani oo hore, barnaamij ama hawl kasta oo qabanayso ama maalgeliso USDA. (dhammaan saldhigyadu ma khuseeyaan dhammaan barnaamijka). Xalka iyo waqtiga kama-danbaysta ah ee xeraynta cabashooyinka wuu kala duwan yahay hadba barnaamijka ama dhacdada. Dadka naafada ah ee u baahan hab kale oo isgaarsiineed si ay u helaan macluumaadka barnaamijka (tusaale, farta indhoolaha (Braille), far waaweyn, cajalad maqal ah, Luqadda Suuldhabaalaynta Mareykanka iwm.), waa inay la xiriiraan wakaaladda Gobolka ama Deegaanka ee maamusha barnaamijka ama la xiriir USDA oo u mar Telecommunications Relay Service lambarka 711 (cod iyo TTY). Waxa dheer, macluumaadka barnaamijka waxa lagu heli karaa luqado aan ahayn Ingiriisi.

Si loo xareeyo cabashada takoorka barnaamijka, waa in la buuxiyaa Foomka Cabashada Takoorka ee Barnaamijka USDA Foomka AD-3027 laga heli karo: <https://www.usda.gov/about-usda/general-information/staff-offices/office-assistant-secretary-civil-rights/how-file-usda-discrimination-complaint/how-file-program-discrimination-complaint> iyo xafiis kasta oo USDA ama adigoo warqad u qoraya USDA oo warqadda waa inay ku yaalaan dhammaan macluumaadka looga baahan yahay foomka. Si aad u codsato nuqul ah foomka cabashada, wac (866) 632-9992. Ugu gudbi foomkaaga ama warqadda USDA sidan:

- 1. boostada:**  
US Department of Agriculture  
Office of the Assistant Secretary for Civil Rights  
1400 Independence Avenue, SW  
Washington, D.C. 20250-9410; ama
- 2. fakis:**  
(202) 690-7442; ama
- 3. iimaylka:**  
[Program.Intake@usda.gov](mailto:Program.Intake@usda.gov)

Machadkani waa bixiye fursad loo siman yahay.